



## Darxumeynta Dumarka Kaga Dhacda Xidhiidh Wehelnimo Xaashida Macluumaadka

Sannadkii 2006, Qoraalka<sup>1</sup> Tiro Koobka Canada waxa uu qoray in:

- 7% dumarka Canada, oo ka mid ah 10% dumarka Alberta, waxay sheegeen in ay darxumo kala kulmeen wehelkooda la nool sanadihii 1999 iyo 2004
- 9% dumarka Canada ee da'doodu ka yartahay 25 sano in ay ku dhacday weerar galmo ama xasarad dembi ah sanadihii 1999 iyo 2004
- 24% dumarka dalka Canada loogu yimi ayaa sheegtay darxumo lagula kacay
- 21% dumarka la darxumeeye waxay sheegteen in darxumadu ku dhacday iyaga oo uur leh
- 5 tii qof ee la dilay 1 baa ka mid ah wehel qof la nool

### Waa maxay darxumeyntu?

#### Darxummada waa hab wax maamulid

- Darxummada xidhiidhka gaarka ah waa dhaqan uu qof ku xakameeyo wehelka la nool. Qofka darxumada wadaa waxa uu adeegsadaa habab badan uu ku helo sida uu doonayo\*, si uu u muujiyo in qof dumarka ah uu u taliyo una diido in ay ka baxdo xidhiidhka ka dhaxeeyaa. Qofka dumarku waxa ay isku daydaa in ay bedesho habka ay u dhaqanto si ay ninka u siiso waxa uu rabo, iyada oo rajjo ka qabta in ay darxumadu joogsato.
- Dhaqanka darxumeyntu waa mid la doortay. Si kastaba ha ahaato taariikhda ama waayo aragnimada ee darxumeeyuhu, waa in uu ugolaadaa cawaaqibka falkiisa. Qofna jid uma lahaa in uu qof kale darxumeeyo, qofna uma qalmo in la darxumeeyo.
- Dumarku, da' kastaba, jinsiyad kastaba, dhaqan kastaba ama dakhli kastaba ha lahaadeen darxumo way ku dhici kartaa. Darxumadu waxay ku kala dhici kartaa dhadig iyo labood ama laba isku mid ah / LGBTQ\*\* ee xidhiidh ka dhaxeeyo. Darxumadu waxa ay noqon kartaa dhibaato ka mid ah: dhibaato jireed, galmo, maskax ama dhaqaale. Darxumeynta qofka dumarka ah waxay hoos u dhigtaa kartideeda ama qiimaheeda qofnimo. Marka qofka dumarka ah lagu cabsiyo ama lagula kaco dagaal waxay ku abuuri kartaa baqdin joogta ah.
- Darxumeyntu iyo dagaalka xidhiidhka gaarka ahma dhaco mar keliya. Waa arrin dhacda bilo iyo sanado badan, una badan in ay marar badan dhacdo, siina xumaato.

### Hababka darxumeynta

Darxumeyntu siyaabo badan ayey isu muujin kartaa. Ta ugu badan waa darxumada jireed, in kastoo darxumooyin ka muuqaal yar ay dhib ahaan la mid yihiin. Hababka darxumeynta waxa ka mid ah:

**HABABKA DARXUMEYNTA MASKAXEED** waxa ay keenaan xanuun iyo dhaawac. Darxumeeyuhu waxa uu “qalab” ahaan u isticmaalaa niyada iyo maskaxda qofka halkii uu qofka uu darxumeeyo ku samayn lahaa weerar jir ahaaneed – “qalab” sida af xumada, dhaqaalaha ama ku saabsan diinta iyo xakameynta dhaqdhaqaqa qofka.

\* Dadka wax darxumeeyaa waa dumar ama rag. Buugani waxa uu ku saabsanyahay dumarka la darxumeeyey. Eeg “Darxumeynta Dumarka ee Ragga ee Xidhiidhka Gaarka ah” xaashida macluumaadka ama buugga waxaa la heli karaa [www.familyviolence.alberta.ca](http://www.familyviolence.alberta.ca).

\*\* Dumarka ama ragga khaniisiinta ah, kuwa labeeka ah, kuwa isbedelay ama kuwa isu heysta in ay leeyihiin dabciga lab iyo dhadig ba iyo kuwa qasan



**HABABKA DARXUMEYNTA JIDHKA** waxa ay ka kooban yahii weero darxumeyahu u adeegsado darxumeynta wehekiisa, sida riixidda, garaacidda, cijinta, timo jiidka ama hub ku cabsigelin. Ula jeedadu darxumeyahu waxay tahay in uu jidhka wehelkiisa gaadhsiiyo xanuun iyo dhaawac jidheed. Dhaawac jidheedka waxa ka mid ah qol ku xidhid ama xarig ku xidhid ama u diidid qofka la darxumeenayo in uu helo gargaar caafimaad.

**HABABKA DARXUMEYNTA GALMADA** waxa ka mid ah wehelka oo loo geysto dilitaan kaga dhaca naasaha, buuryada ama kufsi. Galmadu waxay wehelka ku noqon kartaa darxumo haddii wehelku u arko in ay galmado tahay mid wax yeeli karta, ama rabin, ama hoos u dhig iyo xanuun u geysan karta.

**HABABKA CABSIGELINTU** waa hadalo ama falal darxumeyahu ku cabsiyo wehelkiisa. Tusaale: Burburin hanti, hanjabaad, daba galid ama xasaradeyn.

## Sagaal Arrimood aad qaban karto haddii lagu darxumeyey

1. Marka hore, hubi in adiga iyo caruurgaadu aad nabab gelyo ku sugantihii.
  - **Haddii add khatar deg deh ah ku sugantahay, wac 911.**
  - Sameyso hab lagu badbaado. Haddii wehelkaaga uu mar uun dagaal kugu la kacay, waxaa dhici karta in uu mar kalena kula dagaalamo. Wuxaad u baahantay hab lagu badbaado si hadaad u baahatid aad u gaadhi karto meel aamin ah. Fiiri “habka badbaadada” laga helo [www.familyviolence.alberta.ca](http://www.familyviolence.alberta.ca) ama wac hoyga dumarka ama gargaar ka raadso qeybta booliska ku lug leh Adeega Durmarka la Xumeeyey.
2. Ogow in arrintan masuul aanad ka ahayn. Darxumeyntu waxaa ka masuul ah qofkawada darxumeynta.
3. Garo in darxumeyntu iyo dagaalku ay sii socon doonaanhaddii aan wax laga qaban.
4. Arrintan la socodsii qof aad ku kalsoon tahay. Aamusnaanto awood ayey siisaa darxumeyaha haddii darxumadu sii socoto. Ha is dhiibin.
5. Aqoon raadis bilow ku saabsan darxumeynta xidhiidhada. Keli ma tihid. Dumar kale ayaa arrintanu soo martay, ugu dambeystiina ku guulaystay in ay sameystaan nolol cusub oo haboon. Marka aad isku howshid doonistaan ilo ku gargaara waxaad la kulmi doontaa dad garta arrintaada.
6. Raadi gargaarka aad ka heli karto degaanka bulshadaada aad la nooshahay. Wac telefoonka 24-saac ee Khadka Maclumaadka Dagaalada Qoyska ee **310-1818** ama si aad u heshid warar faahfaahin ah booqo [www.familyviolence.alberta.ca](http://www.familyviolence.alberta.ca).
7. La kulan khabir arrimahaas ku lug leh.
8. Naftaada daryeel. Sameynta wax kasta aad kor ugu qaadi karto jidhkaaga, dareenkaaga, caqligaaga ama ruuxaaga, wax ay kugu gargaari karaan si aad uga gudibtid dhibtan ku haysata una sameysan lahayd nolosha aad rabtid.
9. Waqtii la qaado dad aan darxumo lagu sameyn. Haddii xitaa aysan toos wax kuu tar karin, wax ay ku xasuusin karaan in dadku badankiisu ku noolyahay xidhiidh naxariis iyo wax tar leh. Sidaas oo kale ayaad u noolaan kartaa adiguna.

## Raadi Gargaar

**Haddi naftaadu ama qof aad garaneyso ku sugan yahay khatar deg deg ah, wac 911.** Si aad gargaar uga hesho bulshadaada aad la t nooshahay ama warar faahfaahinsan, fadlan wac khadka 24-saac ee bilaashka ah ee Khadka Macmuulaadka Dagaalada Qoyska ee **310-1818**, ama booqo [www.familyviolence.alberta.ca](http://www.familyviolence.alberta.ca). Adeegyada Caruurga iyo Dhalinyarada ee Alberta wax uu ku kalsoon yahay in uu horseed ka noqdo dadaalka Alberta ee ku saabsan Tirtiridda Dagaalka Qoyska iyo Xoog u Sheegashada.

<sup>1</sup> Tiro Koobka Canada (Oktoobar 2006). *Qiyaasidda Darxumeynta Dumarka: Tiro Koobka 2006* (Diiwaanka No. 85-570-XIE). Ottawa, ON: Qore. Laga keenay <http://www.statcan.ca/english/research/85-570-XIE/85-570-XIE2006001.pdf>

Faahfaahin arrintan ku saabsan, tix raac buuga ku saabsan Dumarka lagu Darxumeyey Xidhiidh Wehelimo; lagana helo [www.familyviolence.alberta.ca](http://www.familyviolence.alberta.ca) ama wac khadka bilaashka ah ee Alberta **310-1818**.